Casharka 5

1. Halkii baa malaa'iguhu ka yimaadeen?
-Waxaa abuuray Ilaah Bilowgii.

2. Markii Ilaah abuuray Malaa'igaha, miyaa Ilaah siiyey jidh iyo dhiig?
-Maya.
-Ilaah baa abuuray malaa'igaha.

3. Maxaa Ilaah u abuuray malaa'igaha?
-Ilaah wuxuu malaa'igaha u abuuray inuu jeclaado awgeed.
-Ilaah wuxuu abuuray Malaa'igaha si ay isaga u adeecaan awgeed.
-Wuxuu kaloo Ilaah malaa'igaha u abuuray inay u adeegaan isaga.

4. Miyaa Ilaah malaa'igaha u abuuray wanaag iyo xumaan?
-Ilaah wuxuu malaa'igaha u abuuray inay wanaag sameeyaan.

5. Ilaa iyo imisa malag ayuu Ilaah abuuray?
-Ilaah wuxuu abuuray malaa'igo fara badan, oo aynaan xisaabi karin.

6. Bilowgii, halkee bay malaa'igaha Ilaah ku noolaayeen?
-Jannada ayey Ilaah la joogeen.

7. Muxuu ahaa malaggii Ilaah xigmadda iyo quruxda u dhammeeyey?
-Waxaa la oran jiray Ibliis.

8. Miyaa Ilaah Shayddaanka ku abuuray wanaag mise xumaan?
-Wanaag.
-Ilaah wuxuu abuuray malaa'ig wanaagsan.



9. Bilowgii, maxaa ku dhacay Ibliiska?
-Ibliiska wuxuu arkay xigmaddiisa iyo quruxdiisa, markaasuu kibray, oo wuxuu doonayey inuu Ilaah jagadiisa qaato.

10. Yuu ahaa kii ugu horreeyey ee xumaanta sameeya?
-Ibliis.

11. Miyaa Ilaah garanayaa in Shayddaanka ama Ibliiska uu doonayey inuu jagadiisa qaato?
-Ilaah wuxuu garanayey fikirrada sharka leh ee Shayddaanka ama Ibliiska.

12. Miyaa Ilaah u oggolaaday Shayddaanka inuu af-gembiyo?
-Maya.

13. Waayo Shayddaanka wuxuu ahaa kii ugu horreeyey oo dembaabay, oo Ilaahna wuxuu beddelahay magaciisii ahaa Ibliis?
-Haddaba uxuu noqday magaciisa cusub Shayddaan.

14. Maxaa magaca Shayddaan uu ka dhigan yahay?
-Magaca Shayddaan wuxuu ka dhigan yahay "Cadow."

15. Sidee baa Ilaah u ciqaabay shayddaanka markii uu sharka sameeyey?
-Ilaah aan buu ugu carooday Shayddaanka, oo wuxuu ka soo bixiyey jannada.

16. Waayo malaa'igihii soo raacay Shayddaanka waxay ku xad-gudbeen Ilaah, Ilaahna wuxuu beddelay magacyadoodii. Balse waa maxay magacyada malaa'igaha raacay Shayddaanka la siiyey?
-Jinniyo.

17. Sidee baa Ilaah u ciqaabay jinniyada raacay Shayddaanka?
-Ilaah aad buu iyagana ugu carooday, oo wuxuu ka soo wada bixiyey jannada.

18. Sidee baa haddaba Ilaah u ciqaabayaa Shayddaanka iyo jinniyadiisa?
-Ilaah wuxuu u diyaariyey meel daa'iman loogu ciqaabayo Shayddaanka iyo jinniyadiisa.

19. Waa maxay magaca meesha lagu ciqaabayo la siiyey?
-Waa Harada dabka daa'iman huraya ama holcaya.

20. Halkee bay ku nool yihiin shayddaanka iyo jinniyada maanta?
-Shayddaanka iyo jinniyada waxay imminka ku nool yihiin dunidan.

21. Maxaa Shayddaanka iyo jinniyadiisa ay samaynayaan maanta?
-Waxay la dagaallamaan hawlaha Ilaah maalin iyo habeenba.

-Bal aynu idiin akhrinno imminka Hadalkii kowaad ee ku qoran kitaabka Ilaah.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:1

1-Bilowgii, Ilaah Samada iyo dhulkuu uumay.

-Waa maxay bilowgii?

-Bilowgii waa wakhti fog markaasoo Ilaah abuuray wax waliba.

-Waa kuma kii bilowgii wax waliba ee dunida yaalla abuuray? Ilaah.



-Wax waliba ee dunida yaalla waxaa abuuray Ilaah Bilwogii.

-Maxaa jiri-jiray bilowgii dunida, intaan Ilaah waxba abuurin? Waxba.

-Haddii aanay dunida waxba oollin, muxuu Ilaah isticmaalay si uu wax waliba ku sameeyey?

-Muxuu Ilaah isticmaalay si uu ku abuuray Samada.

-Muxuuse u isticmaalay si uu ku abuuro qorraxda, dayaxa, iyo Xiddigaha?

-Haddii aanay geedo jirin, miyaad adigu awoodaysaa inaad guri samayso?

-Maya.

-Miyaa dadka caadiga ah awoodayaan inay guryo ka sameeyaan meel cidlo ah ama aan dhagxaan iyo alwaax iyo geedo lahayn?

-Maya.

-Haddii aanay ciid jirin, miyaa dumarku awoodi lahaayeen inay dheryo sameeyaan?

-Maya.

-Miyaa weliba dumarku dheryo ka samayn karaan meel cidlo ah?

-Maya.

-Haddii aan la arag qalabka laga sameeyo waxyaabaha ilmuhu ku ciyaaraan, ee loo yaqaanno alaaba-alaabeey, miyey u suuroobaysaa inay wax soo saaraan?

-Maya.

-Miyaa carruurtu awoodayaan inay Boobmalayaasha ka sameeyaan meel cidla ah?
-Maya.

-Haddii aanay jirin ama waxba oolin dunida, Muxuu Ilaah isticmaalay si uu wax ku abuuray?

-Waxba ma uusan isticmaalin?

-Dabeeana sidee baa Ilaah dunida ku abuuray?

-Ilaah dunida wuxuu ka abuuray hawo cidlo ah.

-Ilaaha Aabbaha ah, iyo Wiilka Ciise Masiixa ay iyo Ruuxa Qoduuska ah ayaa wax waliba ka sameeyey hawo cidla ah.

-Sidee baa Ilaah u awooday inuu Smada iyo dhulkaba ka abuuro Hawo cidla ah?

-Sidee baa Ilaah u awooday inuu wax waliba ka abuuro Hawo cidlo ah?

-Ilaah waa Qaadir.
-Ilaah awooddiisa ma dhammaato.

-Awoodda Ilaahna waa daa'im.



-Miyaa awoodda Ilaah xadaysan tahay?
-Maya.

-Awoodda Ilaah ma lahan xad.
-Awoodda Ilaah dhammaad ma leh.

-Ma jiraan wax aanu Ilaah samayn karin.
-Ilaah wax waliba ayuu samayn karaa.

-Ilaah wuxuu dunida oo dhan ka sameeyey hawo cidlo ah.

-Miyaa cidi Ilaah ka awood badan tahay?
-Maya.

-Miyaa Shayddaanku Ilaah ka awood badan yahay?
-Maya.

-Miyaa shayddaanka jinniyadiisu ay Ilaah ka xoog badan yihiin?
-Maya.

-Miyaa dadku Ilaah ka xoog badan yihiin?
-Maya.

-Miyey jiraan wax aanu Ilaah samayn karin?
-Maya.

-Ilaah wuxuu saayn karaa wax kasta ee uu doonayo inuu sameeyo.

-Ilaah wuxuu samayn karaa wax waliba ee uu ku faraxsan yahay.

-Sidee baa Ilaah ku garanayaa sida wax waliba hawo cidla ah looga sameeyo?

-Miyaa qofi Ilaah bari karaa sida wax waliba loo abuuro?

-Dadku axay carruurtooda baraan sida badarka loo beero, waayo carruurta garan maayaan.

-Haabluhuna waxay carruurtooda baraan sida wax loo gariyo, waayo gabdhuhu garan maayaan sida wax loo kariyo.

-Miyaa haddaba cidi bari kartaa Ilaah sida wax loo abuuro?
-Maya.

-Miyaa qofi bari kartaa Ilaah sida wax waliba loo abuuro?
-Maya.

-Maxaanay dadku Ilaah wax u bari karin?

-Bilowgii, cid halkaas joogtay oo Ilaah wax bartay ma lahayn.

-Haddii Ilaah Ilaah noolaa ka hor Bilowgii, uma uusan baahnayn in qof kale uu Isaga wax baro.

-Waxaa taas wehliya, Ilaah uma baahna in qofi wax baro.

-Maxaa sabab u ah oo Ilaah aanu u doonaynin in cidi wax barto Isaga?

-Ilaah wax waliba wuu garanayaa.

-Ilaah xigmaddiisa ma dhammaato
-Ilaah xigmaddiisu waa daa'im.

-Miyey xigmadda Rabbigu sinaba u xadaysan ahay?



-Maya.

-Xigmadda Rabbigu ma xadaysna.
-Welibana xigmadda Rabbigu dhammaad ma leh.

-Weliba ma jiraan sheey aanu Ilaah garanaynin.
-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba.

-Ilaah wuxuu wax waliba ee dunida yaalla ka abuuro hawo cidla ah.

-Miyaa haddaba cidi ka xigmad badnaan kartgaa Ilaah.
-Maya.

-Miyaa haddaba Shayddaanku ka xigmad badan yahay Ilaah?
-Maya.

-Miyaa jinniyada Shayddaanku uu ka xigmad badan yahay Ilaah.
-Maya.

-Miyaa dadku ay ka xigmad badan yihiin Ilaah?
-Maya.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba iyo wax kasta.

-Taasina waa sababta aynu ugu khasban nahay inynu maqalno Qawlka ama Erayada Ilaah.